



QAADO TALLAALKA COVID-19 EE LA CUSBOONAYSIIYAY SANADKA 2023-2024

Hay'adda CDC waxay ku talinaysaa in qof kasta oo jira 6 bilood iyo wixii ka weyn tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyey. Sedex tallaalka ayaa diyaar ah: Pfizer, Moderna ama Novavax (12 jir iyo wixii ka weyn) oo waxay dhammaantood ka hortagaan xanuunka daran ee COVID-19.

Ma jiro tallaalka si gooni ah lagu taliyey in la qaato. Waa inaad qaadataa tallaalka diyaarka kuu ah oo da'daada ku habboon. Waa caadi inaad qaadatid tallaalka kale oo ka duwan kuurooyinka aad horay u qaadatay.

DA'DA 6 BILOOD ILAA 4 SANO	DA'DA 5 ILAA 11 SANO	DA'DA 12 IYO WIXII KA WEYN	DA'DA 12 IYO WIXII KA WEYN
Ugu yaraan 1 kuuro oo ah tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay (waxaa laga yaabaa inaad u baahato kuurooyin badan oo ah kuwa la cusboonaysiiyay)	1 tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay	AAN LA TALLAALIN 1 tallaalka Pfizer ee la cusboonaysiiyay ama tallaalka Moderna ee COVID-19 AMA 2 kuuro oo ah nooca tallaalka Novavax ee la cusboonaysiiyay	LA TALLAALAY 1 tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay

Fayraska sababa COVID-19 waa mid mar kasta is beddelaya oo difaaca aad ka heshay tallaalkadii hore ee COVID-19 hoos ayuu u dhacayaa waqti kadib. Helitaanka tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay waxay soo celin kartaa difaacii waxayna keeni kartaa difaac la xoojiyey oo ka dhan ah noocyada hadda wareegaya.



Dadka da'doodu tahay 65 sano ama ka weyn waa inay helaan daawo dheeraad ah oo ah tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay. Dadka uu difaacooda jirka si dhexdhexaad ama si daran u laciif yahay waxay heli karaan daawooyin dheeraad ah. La hadal dhakhtarka daryeelka caafimaadkaaga.

La hadal dhakhtarkaaga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto tallaalka COVID-19 ee la cusboonaysiiyay sanadka 2023-2024, ama booqo [Xogta ku saabsan Tallaalka COVID-19 \(www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/vaccine/basics.html\)](http://www.health.mn.gov/diseases/coronavirus/vaccine/basics.html) ama [CDC: La soco wixii ku soo kordha Tallaalka COVID-19 \(www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/stay-up-to-date.html\)](http://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/stay-up-to-date.html) wixii macluumaad dheeri ah.